

Ilaali Badqabka – Xiro Maaskaro ama Gafuur Xir

Tusmada maaskarada iyo gafuur xirka COVID-19 ee macaamiisha—loo shaqeeyaasha iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha taageerada shaqsiga ah, iyo macaamiisha daryeelka gaarka ah.

Maaskarada



KN95 ama qalabka neefsiga ayaa ugu haboon goobaha khatarta badan ee cudurku aadka ugu faafo



Xirashada labo maaskaro adoo adeegsanaaya maaskarada qaliinka iyo tan marada ah



Maaskarada qaliinka oo si fiican kuu le'eg (la xiray oo ganaha loo sameeyay)



Maaskarada marada ah oo leh labo lakab ka badan kaasoo si fiican kuu le'eg



Iyo Gafuur Xirka Lagu Talinaayo

Waayeelka iyo Dadka Naafada ah (APD), Xafiiska Adeegyada Horumerinta Naafada (ODDS), Maamulka Caafimaadka ee Oregon, Waaxda Nidaamka Caafimaadka iyo Gudigga Daryeelka Guryaha lagu baxsho ee Oregon (OHCC) ayaa diyaar u ah inay caawiyaan dadka aan u adeegno iyo shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha taageerada gaarka ah, iyo macaamiisha daryeelka gaarka ah si loo dhawro badqabkooda. Ayadoo la raacaayo tasmada Gudoomiyaha waxaan ilaalinayna xeerka maaskarada iyo gafuur xirka.

Adeeg bixiyaha aan la noolayn macmiilka uu u shaqeeyo waa inuu xidhaa maaskaro ama gafuur xir marka uu bixinaayo daryeelka tooska ah uuna u jiro wax ka yar 6 fiid macmiilka uu u shaqeeyo ama marka uu taageero ku siinaayo bulshada.

Gafuur xirka marada ah wuxuu noqon karaa mid gacan ku samays ah. **Ma** adeegsan karaan dadka laga helo caabuqa COVID-19.

Lifaaqa laga helaayo Xogta Gafuur Xirka ee OHA:

<https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li2390L.pdf>

Macaamiisha qaba naafooyinka iyo adeeg bixiyaasha

Haddii maaskaro ay sababto dhib dhanka dareenka ah oo ku yimaada macmiilka aad u shaqayso ama haddii macmiilka loo shaqeeyo uu codsado in adeeg bixiyihiisu uusan xiran maaskaro, shaqaalaha ayaa laga dhaafi doonaa shardiga maaskarada. Haddii adeeg bixiye uu qabo xanuun ka hor istaagaaya inuu xirto maaskaro, wuxuu codsan karaa kaalmada ADA. Adeeg bixiyaasha haysta adeegyada ADA ayaa laga dhaafayaa xirashada maaskarada. Lifaaqa laga helaayo Xeerarka Maaskarada Wajiga: <https://nwadacenter.org/factsheet/face-coverings-and-businesses-balancing-ada-public-health-during-covid-19-0>. Macaamiishu waa inay u sheegaan maareeyahooda kiiska, wakiilka gaarka ah ama iskuduwaha adeegyada dookhyadooda. Adeeg bixiyaashu waa inay u diraan codsiyada shardi dhaafka maaskarada ee ADA: ohcc.ada@dhsola.state.or.us

Qalabka Difaaca Shaqsiga



Adeeg bixiyaasha ayaa helaaya maaskarooyinka iyo gacmo gashiyada inay buuxshaan ayna ku diraan codsi foomka oonleenka ah ee SEIU ama inay iimeel u diraan OHCC.

- Barta SEIU: <https://seiu503.tfaforms.net/622>
- Adeegga Oonleenka ah ee OHCC: <https://forms.office.com/g/untNXn1Vmi>
- Iimaylka OHCC: OHCC.CustomerRelations@dhsola.state.or.us



Waxaad dukumiintigaan ku helaysaa luuqado kale, far waawayn, farta indhoolka ama qaab aad adiggu dooranayso. Kala xiriir OHCC 877-867-0077 ama i-meel u soo dir Xiriirada Macmiilka OHCC OHCC.CustomerRelations@dhsola.state.or.us.